

# Fahanka Warbixinta Ardaygaaga

## Gobalka Maine ayadoo la Adeegsanaayo Buundada Cabirka Imtaxaanka Sanadka

Jaantusyada midabka leh, ee jiifa ee ku qoran bogaga 1 iyo 2 ee warbixinta ardaygaaga ayaa muujinaaya buundada heerka ardaygaaga. Buundadaan ayaa cabiraysa dedaalka ardaygaaga ee ku aadan imtaxaankaan ayadoo laga eegaayo xirfadaha muhiimka ah ee akhriska iyo xisaabta ee heerka fasalkiisa marka loo eego Heerarka Buundada Guud ee Gobalka.

Imtaxaanka akhriska ee fasalka 3-aad wuxuu cabiraa xirfadaha sida:

- Ka jawaabida su'aalaha ku saabsan sifooyinka, goobaha, iyo dhacdooyinka ku jira sheekada.
- Aqoonsiga casharka ku jira sheekooyinka dadkii hore iyo qisooyinka ka yimid dhaqannada kala duwan.
- Helista fikirka guud iyo faahfaahinta muhiimka ee qoraallada xogta.
- Adeegsiga qaybaha qoraalka sida ciwaannada iyo erayada muhiimka ah si xog degdeg ah loo helo.

Imtaxaanka xisaabta ee fasalka 3-aad wuxuu cabiraa xirfadaha sida:

- Fahanka xeeladaha isku dhufashada iyo qaybinta tirooyinka ka hooseeya 100.
- Abuurista fahan ku aadan jajabyada.
- Abuurista fahan ku aadan qaababka safar xagalka iyo badka.
- Qeexida iyo qiimeynta qaababka labada qaybood ah.

## Buundooyinka Aaga Casharka

Buundooyinka Aaga Casharka oo ku qoran bogga 2 ee Warbixinta Gaarka ah ee Ardayda ee ardaygaaga ayaa kuu sahlaaya inaad aragto dhinacyada uu awooda u leeyahay iyo meelaha uu ardaygaagu u baahan yahay inuu hormar ka sameeyo maadadaas. Ma aha wadarta guud ee buundada maadada oo dhan.

Tusaale, haddii ardaygaagu uu buundada ugu sarayso ka haysto Qoraalka Aqoonta Luuqada, aagaas ayaa noqonaaya meel uu heer sare ka gaaray. Haddii buundada Qoraalka Warbixinta uu hooseeyo, taas ayaa noqonaysa aag uu ku liito.

Fadlan la xiriir macalinka ardaygaaga si aad xog dheeri ah uga hesho sida aad u taageeri karto waxbarashada ardaygaaga ee Aagagaan Casharka.